# Sharciga Kaalmada Dhaqaale

**Sharciga:**

Isbitaalku wuxuu bukaanka iyo/ama kafaalaqaadeyaasha u hayaa fursado kaalmo dhaqaale. Sharcigeenna ayaa faahfaahinaya habka loo codsado kaalmada dhaqaale, macluumaadka diyaarsan ee ku saabsan sharciga iyo siyaabaha lagu go'aamiyo sida xaq loogu yeesho. Isbitaalku wuxuu fahamsan yahay bukaanka iyo/ama kafaalaqaadeyaasha in aysan awoodi karin in ay iska bixiyaan adeegyada isbitaalka iyadoo ay ugu wacan tahay shuruudo aan la sii ogaan karin, in aysan ceymis haysan ama in uusan qofkii lacagta iska bixin lahaa uusan awoodin kharashka laga rabo. Sharcigan waa mid lagu sameeyey dibu-eegis si uu u noqdo mid waafaqsan Qaanuunka Hay'adda Canshuuraha 501(r).

Isbitaalka wuxuu xad u yeelaa kharashka imarjensada iyo/ama wixii kale oo caafimaad ahaan muhiim ah ee ah daryeelka loo sameeyo bukaanka iyo/ama kafaalaqaadeyaasha kuwooda xaq u yeelan kara kaalmo dhaqaale sida ku qoran sharcigan waa in uusan ka badan lacagta guud ee dadka ceymiska haysta lagu dallaco (AGB).

Qiimadhimis lagu yareeyo lacagta kharashka guud ee la isku dallaco waxa la oggolaan doono waa boqolkiiba in ka mid ah inta guud ee lagu dallaco iyadoo lagu saleynayo heerka xaq loo yeelan karo ee ku dhigan sharcigan.

Qiimadhimis loo sameeyo qoysaska dhibaateysan ee haysta ceymis lacagta ka bixin kara wuxuu ku saleysnaan doonaa kharashka soo hara ee ah qeybta iyaga laga rabo iyo/ama kharashka ceymis labaad.

Adeegyada aan ceymis ku jirin waxaa loo oggolaan doonaa qiimadhimis la mid ah qiimadhimista dadka aan ceymiska haysan.

Sharcigan wuxuu khuseeyaa adeegyada oo dhan, sida adeegga imarjansada, balse waxaa ka baxsan adeegyada dadku iibsan karaan sida daawooyinka farmashiyaha, makhaayadda cuntada iyo barxadda baabuurta la dhigto.

Sharcigan wuxuu khuseeyaa adeegyada uu bixiyo iyo wixii qaansheegad ah ee ka yimaada Isbitaalka iyo qeybihiisa kala duwan ee ah imarjaso, sida isbitaalka iyo goobaha kale ee ah kilinigyada iyo takhasuska. Sharcigan ma khuseeyo dhakhaatiirta aan u shaqeyn ama uusan qaansheegadkoodu ka imaan karin adeegyada xirfadleyaasha Isbitaalka. Liis meelo gaar ah oo sharcigan dhigayo ayaa la socda qoraalkan bogaggiisa ugu dambeeya (Raadraaca A), kuwaasoo la cusbooneysiin doono saddexdii biloodba mar.

**Qeexid:**

**Lacagta caadi ahaan la isku dallaco (AGB):** Waxaa lagu xadeeyaa kharashka imarjensada iyo/ama wixii kale oo caafimaad ahaan muhiim ah ee noqda daryeelka loo sameeyo dadka xaqa u leh kaalmo dhaqaale si aysan kharashka laga rabo uga badan tan caadi ahaan lagu dallaco dadka ceymiska haysta (AGB).

Isbitaalku wuxuu ku dhaqmaa hab la yiraahdo 'dibu-eegid'. Lacagta caadiga ah ee AGB waxaa loo xisaabaa iyadoo loo qeybiyo 12 bilood oo ah cabashada lacag-celinta ay oggol yihiin ururka lacagaha la isku dallaco. Xisaabinta waxaa ku jirta cabashooyinka Medicare, Medicaid iyo dhammaan ceymisyada gaarka loo leeyahay. Boqolleey cusub oo ah lacagta caadiga ah ee AGB waa in la diyaariyo maalinta 120-aad ka dib 12-ka bilood ee loo adeegsaday in la xisaabiyo AGB.

**Lacagta La Waayo:** Lacagta la waayo waa waajibaadka aan laga soo bixin ee ah daryeel loo sameeyey bukaanno la go'aamiyey in ay qaan bixi karaan, balse aan dooneyn in ay qaanbaxaan.

**Dedaalka Aan Caadiga Ahayn ee Soo-qaadidda Lacagta (ECA)** Waxaa jira afar nooc oo ah habab lacagta lagu soo qaado oo loo tixgeliyo hababka aan caadiga ahayn ee soo-qaadidda lacagta (ECA):

1) In lagu dhaqaaqo hab u baahan sharci ama nidaam qaanuuni ah (sida inaan xaq u yeelanno la wareegidda iyo iibinta hanti qof leeyahay, inaan hanti ma guurto ah qof kala wareegno, in aan sharci ahaan mushaar si toos ah uga soo goosanno kharash, inaan gacanta ku dhigno xisaab bangi qof u taalla ama hanti, inaan qof ku soo oogno dacwad madani ah, inaan qof xirno...)
2) Kharashka aan sugeyno inaan shirkad saddexaad ka sii iibinno
3) Inaan warbixin xun u gudbinno xafiisyada sumcadda amaahda ama xafiisyo
4) Arrimaahaaga inaan ku keeni karno dibudhac ama diidmo (ama in lagaaga baahdo inaad qaanbaxdo intaan wax laguu qaban) caafimaad ahaan wixii muhiim u ah daryeelkaaga iyadoo laguugu diidayo qaanbixid la'aanta daryeel hore laguuna eegayo sharciga kaalmada dhaqaalaha ee kaa bixin lahaa.

**Kaalmo Dhaqaale:** Isbitaalka wuxuu bukaanka iyo/ama kafaalaqaadeyaasha u hayaa barnaamij ah kaalmo dhaqaale oo noqon karta qiimadhimista dadka dhibaateysan iyo barnaamijka qiimadhimista bukaanka aan ceymis haysan. Qoys in ay xaq u yeeshaan kaalmada dhaqaale waxay ku xiran tahay dakhliga, tirada dadka guriga ku nool, in ay awoodi karaan kharashka iyo/ama ceymiskoodu inta uu ka bixinaayo. Tirada dadka guriga waxaa lagu saleeyaa sida sharcigu dhigayo.

**Qiimadhimista Dadka Dibaateysan:** Qiimadhimista dadka dhibaateysan waa qiimadhimis ah kharashka guud, taasoo loo oggol yahay qoysaska haysta ama aan haysan ceymis , balse dakhligooda iyo tirada qoyskoodu ay ka hooseeyaan heerarka saboolnimo ee dowladda dhexe sida ku dhigan sharcigan.

**Tirada Dadka Guriga:** Tirada qoysa waa carruurta qoysku haysto; wixii ah masruufka carruurta oo qoysku helo waa in loo qoro dakhli ahaan. Qoyska waxaa ku jiri kara waalidiinta iyo carruurta ilaa iyo 20 jir (waa sida ku qoran heerarka caafimaadka dowladda ee Medicaid). Awooweyaasha iyo ayeeyooyinku kuma jiraan.

**Adeegyada aan dadka laga bixin** Addeegyada caafimaadka ee aysan bixin Medicaid/Medicare ama ceymiska shakhsiga ah waxaa noqon kara gudniinka, tuubbooyinka dhegaha iyo is-qurxinta.

**karin:**

**Luuqad Fudud oo Kooban**

Sharraxaad yar oo ku saabsan shuruudaha xaq loogu yeesho, hannaanka codsiga iyo kaalmada intaba waxaad ka heleysaa sharciga kaalmada dhaqaalaha

**Filashada Xaqu-yeelasho:**

Lacagaha qaarkood ayey maamulku go'aan ku gaari karaan in loo tixgeliyo kaalmo dhaqaale oo toos ah marka bukaan/kafaalaqaade uusan awoodi karin in uu bixiyo lacagta laga rabo qeyb ahaan ama gebi ahaan. Lacagahaas waxaa ku jira kuwa soo gaara kama dambeysta soo-qaadidda lacagaha la bixin waayey ee aan haysan ceymiska dowladda ee Medicaid markii adeegga loo sameeyey balse dib hadda ka helay ceymiska dowladda ee Medicaid iyo adeegyada loo sameeyo dadka darbi-jiifka ah ee aan ceymis haysan. Caddeyn sababeysan ayaa la soo raacinayaa qoraalka xafiiska qaansheegadka oo waa in uu oggolaado Agaasimaha Maamulka Dakhliga ama Ku-simahiisa

**Hannaanka:**

**Heerarka Xaqu-yeelasho:**

Xaqu-yeelashada bukaan iyo/ama kafaalaqaade ee kaalmada dhaqaale waxa ay ku saleysan tahay waa qiimeynta baahida

Isbitaalku wuxuu sameeyaa heerar ah qiimadhimis kala duwan oo ku xiran haddii bukaan iyo/ama kafaalaqaade uu haysto ceymis ah shirkad saddexaad

Bukaanka iyo/ama kafaalaqaadaha waa inuu si buuxdaa ula shaqeeyo habka codsiga Isbitaalka si loogu sameeyo qiimadhimista kaalmada dhaqaale.

Bukaanka iyo/ama kafaalaqaadaha waa inuu codsado dhammaan wixii kharash ka bixin kara oo ah gobolka iyo dowladda dhexe ee uu heli karo ka hor intuusan helin kaalmada dhaqaale ee Isbitaalka.

Sharcigan wuxuu khuseeyaa bukaanka / qoysaska ku nool shanta goobood ee adeegga gobolkeenna (Minnesota, Iowa, North Dakota, South Dakota iyo Wisconsin). Bukaanka ka baxsan goobahaas kiisaskooda mid mid ayaa loo eegi doonaa.

Mashiin xisaabiya kaalmada dhaqaale ayaa diyaar ku ah shabakadeenna si uu caawimaad ugu noqdo bukaanka/kafaalaqaadeyaasha in ay fahmaan haddii ay xaq u yeelan karaan in ay helaan kaalmo:
http://www.childrensmn.org/forms/financialcalculator/index.php

Isbitaalka kolkii uu doono ayuu ka noqon karaa in sharcigan uusan khuseyn qoysaska ama shakhsiyaadka aan daacad u ahayn in ay ku daraan carruurtooda ceymis ay heli karaan ama ceymis dowladeed ama aan ka soo jawaabin manaafacaadka ceymiskooda ee laga codsaday wakhtigii uu ka filaayey Isbitaalka iyo/ama shirkadda ceymiska.

Ururrada samafalka iyo kaniisado bixiya dhaqaalaha isbitaalka ee daryeel ka hela Isbitaalka waxaa la siin doonaa qiimadhimis la mid ah oo aan ka badneyn tan qaansheegadka guud ee bukaanka ceymis haysta. Isbitaalku wuxuu tixgelinayaa waxyaabo kale oo lug ku yeelan kara go'aanka lagu oggolaado ama lagu diido kaalmada dhaqaale. Habkan dadka ka baxsan waxaa lagu qeexay qeyb kale oo ka mid ah sharciga.

**Macluumaadka**

Waa masuuliyad saaran shaqaale kasta oo jooga Isbitaalka in uu aqoonsado oo

**diyaarsan ee sharciga Kaalmada dhaqaale:**

qoysaska ku wargeliyo kaalmada dhaqaale ee diyaarka ah.

Isbitaalku wuxuu si joogto ah u baaraa bukaanka oo dhan iyo bukaan-socodka dhaqaalahoodu liito, kuwa haysta ceymis ka raba in ay qeyb badan bixiyaan ama kuwa haysta ceymiska hawlgabka dowladda ee SSI oo ay ku muteystaan shuruudo naafannimo

- **Manaafacaadka SSI**
- **Medicaid (oo ay ku jiro Kaalmada Caafimaadka Imarjansada MA)**
- **COBRA**
- **Qorsheyaasha shakhsiga ah ee ceymiska caafimaadka**
- **Qorsheyaasha kooxda ah ee ceymiska caafimaadka**

Foomamka codsiga kaalmada dhaqaale waxaa si bilaash ah looga heli karaa dhisme kasta oo ka tirsan Isbitaalka carruurta ama waxaa lagu soo codsan karaa taleefanka, fakis ahaan, waraaq la soo diro ama in toos loo yimaado wakhtiyada shaqada ee xafiiska la-talinta dhaqaalaha. Foomka codsiga waxa kale oo laga heli karaa goobaha soo-dhaweynta ee ku yaalla dhisme kasta iyo imarjansada saacad kasta iyo maalin kasta.

**Isbitaalka – Minneapolis**
*Taleefanka: 612-813-6432*
*Fakis: 612-813-6429*
*Cinwaanka Waraaqaha:* Financial Counseling #32-2109, Children's of Minnesota, 2525 Chicago Ave S, Minneapolis, MN 55404
*Xafiiska:* Family Resource Center, Dabaqa 2aad, ka soo horjeedka miiska soo-dhweynta ee Welcome Center desk

**Isbitaalka – St. Paul**
*Taleefanka: 651-220-6367*
*Fakis: 651-220-6125*
*Cinwaanka Waraaqaha:* Financial Counseling #60-247, Children's of Minnesota, 345 N Smith Avenue, St Paul, MN 55102
*Xaiiska:* Family Resource Center, River Tower, Dabaqa 3aad, #3107

Dadka aan aqoon fiican u lahayn afka Ingiriiska waxaa loo hayaa turjumaadda sharciga kaalmada dhaqaalaha, foomka codsiga iyo luuqad fudud oo kooban.

**Hababka Ogeysiiska Sharciga Kaalmada Dhaqaale ee Isbitaalka**

Macluumaad ku saabsan sharciga Isbitaalka ayaa la siiyaa dhammaan bukaanka/qoysaska

- marka la seexinayo
- marka uu u yimaado la-taliyaha dhaqaalaha
- shabakadda Isbitaalka ee dadweynaha, www.childensmn.org
- qoraallada qaansheegadka ah iyo waraaqaha soo-qaadidda lacagta ee bukaanka/kafaalaqaadayaasha
- saxiixidda oo ah af Ingiriis iyo afka hooyo waxaa si cad loogu gudbinayaa gebi ahaan goobaha Isbitaalka ee ah qaabbilaadda iyo diiwaan gelinta oo ay ku jirto Waaxda Imarjensada

**Waajibaadka bukaanka/kafaalaqaadaha:**

Bukaanka iyo/ama kafaalaqaadaha waa inuu codsado dhammaan wixii kharash ka bixin kara oo ah gobolka iyo dowladda dhexe ee uu heli karo ka hor intuusan helin kaalmada dhaqaale ee Isbitaalka

Waa in la soo gudbiyo foomka codsiga oo buuxsan oo ay la socdaan wixii caddeymo ah oo la rabo in loo tixgeliyo La-talinta Dhaqaalaha ama waa in lagu soo diro cinwaanka sharcigan ku qoran

Bukaanka iyo/ama kafaalaqaadaha waxaa looga baahan yahay macluumaadka xaqiijinta dakhliga

- Haddii aad shaqeyso soo dir mushaarkii aad qaadatay 30-kii maalmood ee ugu dambeeyey. Haddii dakhligaagu is beddelo bil kasta, fadlan noo keen 90 maalmood
- Haddii aad iskaa u shaqeysato oo aadan qaadan mushaar, soo dir koobbi ka mid ah foomkaaga Canshuurta Federaalka ee ugu dambeeyey
- Haddii aad hesho dakhi kale, sida dakhli kiro ama masruufka carruurta, soo dir xisaab-xirka kharashkaaga ee bil kasta
- Haddii aad hesho manaafacaadka caymiska dowladda ee SSI ama Lacagta Dadka Shaqada ka Go'day, soo dir koobbiga waraaq sheegeysa manaafacaadkaaga

Haddii foomka kaalmada dhaqaale uusan buuxsaneyn oo aan la-taliyaha dhaqaalaha loogu soo gudbin dhammaan caddeymaha dheeraadka ah 30 maalmood gudahood, codsiga waa la xirayaa oo bukaanka/kafaalaqaadaha waxaa loo soo dirsan doonaa qaansheegadka lacagta ku harsan. Codsiga dib ayaa loo furi karaa haddii qofka codsanaya laga helo foomka codsiga kaalmada dhaqaale oo buuxsan. Si loo codsado kaalmo dhaqaale bukaanka/kafaalaqaadaha wuxuu haystaa 240 maalmood laga soo bilaabo maalintii isbitaalka laga saaray ee ugu horreysay.

Lama tixgelin doono foomka codsiga ah ee aan buuxsaneyn, oo waxaa dadka loo soo diraa waraaq looga codsanayo caddeymaha ka maqan, taasoo ay u weheliso Luuqad Fudud oo Kooban oo ku saabsan sharciga kaalmada dhaqaale.

**Waajibaadka Xafiiska La-talinta Dhaqaalaha:**

Marka la helo foom codsi ah oo buuxsan, la-taliye dhaqaale oo raacaya nidaamka hoos ku qoran ayaa eegi doona foomka la soo buuxiyey iyo dhammaan caddeymaha la socda:

- Haddii aysan ceymis haysan bukaanka iyo/ama kafaalaqaadaha, habka kaalmo xaq loogu yeesho waxaa lagu saleeyaa tirada qoyska iyo dakhliga iyadoo la raacayo nidaamka heerarka saboolnimo ee federaalka (Raadraaca B) oo waa in la waafajiyo sharcigan.
- Haddii uu bukaanka iyo/ama kafaalaqaadaha haysto ceymis, kaalmada waxaa lagu go'aaminayaa iyadoo la eegayo foomka codsiga kaalmada dhaqaale iyo nidaamka heerarka saboolnimo ee federaalka. Bukaanka iyo/ama kafaalaqaadeyaasha xaq u yeesha waxaa la siiyaa qiimadhimis ah 30% oo laga gooyo qeybta laga rabo ama ceymiska labaad. Ma jirto wax ah qiimadhimis qeybta bukaanka oo la isu daayo wakhtiga adeegga.

Habka eegista ah markay dhammaato xafiiska la-talinta dhaqaalaha ayaa bukaanka iyo/ama kafaalaqaadaha u dira waraaqda go'aanka oo ah xaq u yeelasho si loo ogeysiiyo natiijada kaalmada dhaqaale.

Xafiiska la-tainta dhaqaalaha ayaa bukaanka iyo/ama kafaalaqaadaha ogeysiin doona foomka codsiga aan buuxsaneyn inta laga shaqeynayo foomka codsiga

Wakhtiga laga soo shaqeynayo wuxuu qaadan karaa ilaa 3 usbuuc laga soo bilaabo taariikhda la helay foomka oo buuxan iyo caddeymaha kale oo dhan. Wixii ah xisaab lacageed 30 maalmood ayaa la joojinayaa inta codsiga laga shaqeynayo.

Haddii la soo oggolaado kaalmada dhaqaale ee Isbitaalka, maalinta laga bilaabi doono heerka kaalmada iyo wixii ah qiimadhimis lacagta aan la bixin waxaa waraaq ahaan loogu soo sheegi doonaa bukaanka iyo/ama kafaalaqaadaha.

Go'aammada kaalmada dhaqaale waxay shaqeyn doonaan waa hal sano.

**Waajibaadka xafiiska qaansheegadka:**

Xisaab-xiridda ugu horreysa ee marka isbitaalka laga baxo waxay ku qornaan doontaa luuqad fudud oo kooban oo ah sharciga xafiiska dhaqaalaha Isbitaalka.

Foomka codsiga ee kaalmada dhaqaale waxaa la tixgelin doonaa ilaa iyo 240 maalmood ka dib taariikhda xisaab-xiridda koowaad marka loo diro bukaanka ama kafaaladqaadaha. Foomka codsiga kaalmada dhaqaale uma baahna in kol labaad la soo gudbiyo ilaa saddex bilood ka dib taariikhda foomka codsigii u dambeeyey

Haddii foom codsi ah oo buuxsan la soo gudbiyo maalinta 240-aad ee xilliga foomka codsiga, isbitaalku wuxuu u tixgelinayaa in ay ka soo gaareen oo ma sameyn doono dedaal aan caadi ahayn oo ah soo-qaadidda lacagaha la bixin waayey, balse waxaa go'aan laga gaari doonaa haddii bukaan/kafaalaqaade ay xaq u yeelan karaan oo qoraal ayaa lagu soo wargelin doonaa go'aanka iyadoo loo gudbinayo xisaab-xirid qaansheegad ah oo muujineysa lacagta lagu leeyahay iyo sida loo go'aamiyey.

Isbitaalku kuma dhaqaaqayo in ay bilaabaan dedaal aan caadi ah iyo falal la xiriira soo-qaadidda lacagaha la bixin waayey ugu yaraan 120 maalmood ka dib laga soo bilaabo maalinta isbitaalka laga baxo xisaab-xiridda ugu horreysa.

Lacag soo celinta ka badan sharci ahaan kaalmada dhaqaale ee la iska rabo waxaa laga reebayaa qeybta uu bixiyo marka loo adeegayo bukaanka ceymis haysta.

Haddii qeyb ahaan la sameeyo qiimadhimis, bukaanka/kafaalaqaadaha waxaa loo diri doonaa xisaab-xirid ku xigta foomka codsiga qiimadhimista. Lacagta baaqiga ah waa in lagu soo bixiyo si buuxda ama qorshe ah marba in. Qorshe lacagta lagu bixiyo oo aan lahayn dulsaar waxa lagu heli karo waxaa ay ku xiran tahay waa xisaabta lacagta harsan.

**Sharciga soo-qaadidda lacagaha iyo qaansheegadka:**

Isbitaalku wuxuu si gaar ah u ambaqaadaa Sharci ah Habka Qaansheegadka iyo Soo-qaadidda Lacagta. Sharcigan waxaa laga heli karaa shabakadda Isbitaalka, in la soo diro kolka la soo codsado, qeybta imarjensada iyo meelaha diiwaan gelinta bukaanka.

**Oggolaanshaha Kaalmada Dhaqaalaha:**

Lacagta la bixin waayey ee la cafinayo oo dhan waxay u baahan yihiin in ay marka hore oggolaadaan:

Qeybta bukaanka ee adeegyada xirfadle (kilinig) – maamulaha kilinigga
Xisaabta baaqiga ah $0-4,999 – la-taliyaha dhaqaalaha

Xisaabta baaqiga ah $5,000-$100,000 – agaasimaha dhaqaalaha
Xisaabta baaqiga ah ee ka badan $100,000 – maamulaha sare ee dhaqaalaha

**Ka-reebid:** Bukaanka iyo/ama kafaalaqaadaha waxa uu kala dooran karaa inuu go'aanka kaalmada dhaqaale ee Isbitaalka ka codsado ka-reebid ama racfaan.

Codsiga racfaanka wuxuu ku eg yahay 45 maalmood gudahood ka dib diidmada kaalmada dhaqaale.

Codsiga racfaanka ama ka-reebidda waa in loo diro waaxda la-talinta dhaqaalaha oo cinwaankoodu ku qoran yahay sharcigan. Codsiga waxaa eegi doona maamulaha diiwaan gelinta iyo la-talinta dhaqaalaha iyo agaasimaha maamulka dakhliga.

Jawaabta racfaanka waxay ku soo baxdaa 2 usbuuc gudahood codsiga ka dib.

Sharcigan dadka laga reebi karo waa qoysaska haysta dakhli ka badan heerarka noo qoran ama dadka aan si kasta waxba iska bixin karin iyada oo la tixraacayo macluumaadka qoyska laga helo oo uu Isbitaalkuna eegi doono.

Boqolleyda hoose ayaa la raacaa si loo go'aamiyo inta ay dadku bixin karaan.

1. Qoysaska dakhligoodu ka badan yahay heerka saboolnimada ee 350% oo xisaabta lagu leeyahay ay ka sarreyso 10% oo ah dakhligooda guud waxa ay heli doonaan qiimadhimis la mid ah boqolkiiba inta la go'aamiyo oo ah lacagta caadiga ah ee guud (AGB)
2. Dhammaan codsiyada kale ee dadka sharciga laga reebo iyo/ama racfaannada waxay u baahan yihiin caddeyn taakuleyneysa xaaladahooda iyo baahida.
3. Bukaanka iyo/ama kafaalaqaadaha waxay soo gudbin karaan foom codsi ah oo cusub haddii ay is beddelaan baahidooda daryeelka ama xaaladdooda dhaqaale.

**Waajibaadka Guddiga Agaasimeyaasha:** Guddiga agaasimeyaasha ama guddi ah wufuud isku dhafan ayaa sameyn doona dibu-eegis sannadle ah oo ku saabsan sharciyada la xiriira soo-qaadidda kharashaadka caafimaadka ee la bixin waayey, qiimadhimista dadka aan ceymiska haysan iyo kaalmada dhaqaale. Guddiga waxa kale oo uu eegi doonaa natiijooyinka ka soo baxa kormeeridda xisaabaadka sannadlaha ah ee waxyaabahaas la xiriira iyadoo loo eegayo sida uu dhigayo sharciga Heshiiska Qareenka Guud ee Minnesota.

| Qiimadhimis | 30% | 100% | Kilinigga Bukaan-socodka AGB 39% Isbitaalka AGB 49% |
|---|---|---|---|
| **Tirada Qoyska** | | | |
| 1 | $41,580 | $32,670 | $41,580 |
| **Bil Kasta** | **$3,465** | **$2,723** | **$3,465** |
| 2 | $56,070 | $43,808 | $56,070 |
| **Bil Kasta** | **$4,673** | **$3,651** | **$4,673** |
| 3 | $70,560 | $55,248 | $70,560 |
| **Bil Kasta** | **$5,880** | **$4,604** | **$5,880** |
| 4 | $85,050 | $66,825 | $85,050 |
| **Bil Kasta** | **$7,088** | **$5,569** | **$7,088** |
| 5 | $99,540 | $78,210 | $99,540 |
| **Bil Kasta** | **$8,295** | **$6,518** | **$8,295** |
| 6 | $114,030 | $89,595 | $114,030 |
| **Bil Kasta** | **$9,503** | **$7,466** | **$9,503** |
| 7 | $128,555 | $101,008 | $128,555 |
| **Bil Kasta** | **$10,713** | **$8,417** | **$10,713** |
| 8 | $143,115 | $112,448 | $143,115 |
| **Bil Kasta** | **$11,926** | **$9,371** | **$11,926** |
| 9 | $157,675 | $123,888 | $157,675 |
| **Bil Kasta** | **$13,140** | **$10,324** | **$13,140** |
| 10 | $172,235 | $135,328 | $172,235 |
| **Bil Kasta** | **$14,353** | **$11,277** | **$14,353** |
| 11 | $186,795 | $146,768 | $186,795 |
| **Bil Kasta** | **$15,566** | **$12,231** | **$15,566** |

Waxaa lagu saleeyey Heerarka Saboolnimada Federaalka bishii Febraayo , 2016

*Tirada qoyska waxaa lagu go'aamiyo waa lambarka dadka ku qoran foomkii canshuur celiska ahaa ee ugu dambeeyey ee qoyska. AGB = Lacagta caadi ahaan la isku dallaco.